



(Dib loo eegay Abriil 2025)

Kahortagga Ku Faafidda Jadeecada Gudaha Isbitaalka Carruurta ee McMaster

Haddii adiga iyo/ama ilmahaagu aad leedihiin astaamaha jadeecada (qandho, qufac, duuf, indho cas, finan) ama aad isbitaalka u joogtaan baaritaanka jadeecada:

- adiga iyo ilmahaaga waxa la idin gelin doonaa qol leh hawo socod xakamaysan ama mishiin gaar ah oo la yidhaahdo HEPA Filter si looga hortago faafidda jadeecada.

Kahor intaadan imaan Waaxda Gurmada Xaaladaha Degdegga ah

- Noo sheeg inaad imanayso isbitaalka haddii aad u malaynayso in ilmahaagu qabo jadeeco ama uu ag joogay qof kale oo jadeeco qaba.
- Haddii aad ku imanayso ambalaas, u sheeg KALKAALIYAASHA.
- Haddii aad keligaa timaadid QAYBTA GURMADKA DEGDEGGA AH, qof weyn oo la tallaalay waa in uu marka hore isbitaalka kaligiis galaa si uu ugu sheego shaqaalaha diiwaangelinta in qof jadeeco qabo uu soo gelayo.

AMA

- Wac (905) 521-5020 kahor intaadan iman oo aan ogaano adiga ama ilmahaaga inaad jadeeco qabto.
- Waxaanu kugula kulmi doonaa albaabbada bannaankeeda oo waxaanu ku gayn doonaa qol.

Ballanta kiliiniga

- Haddii adiga/ilmahaaga aad ku leedihiin ballan KILIINIGA, wac kiliinigaada kahor intaadan ballanta u iman.
- Adiga/ilmahaagu waxaad u baahan kartaan in la idinka baadho jadeecada.

- Waxaa kale oo aanu kuu diyaarin doonaa boos ballantaada.

Inta lagu gudajiro booqashadaada isbitaalka

- Adiga iyo ilmahaagu waa inaad ku jirtaan qolkaaga oo albaabku xidhan yahay. Qolalka qaarkood waxay u baahan yihiin shaandhada HEPA. Tan waxa loo yaqaan go'doominta cudurrada hawada ku faafa.
- Haddii aad u baahan tahay inaad u baxdo baaritaannada ama musqusha - shaqaalaha ayaa kaa caawin doona taas.
- Qof kasta oo soo gala qolka wuxuu xidhan doonaa goon, galoofisyo, maaskaro iyo ilaaliyaha indhaha.
- Waxaanu u baahan karnaa inaan xaddidno tirada booqdayaasha

Ka bixitaanka isbitaalka (Qaybta Gargaarka Degdegga ah iyo Kiliiniga)

- Waxaanu kaa caawin doonaa inaad ka baxdo isbitaalka iyada oo loo marayo dariiqa ugu gaaban uguna badbaadsan. Fadlan sug ilaa aan ku caawin karno.
- Waxaan kuu haynaa meel aad fadhiisato haddii aad sugayso gaadiid. Ha fadhiisan meelaha sugitaanka ama ha ku soo noqon isbitaalka si aad u sugto.
- Ka dib markaad ka baxdo isbitaalka, HA KU soo laaban isbitaalka, maqaayadda, kafateeriyada ama farmashiyaha ilaa aad u baahan tahay daryeel degdeg ah.
- Haddii aad u baahan tahay inaad soo noqoto, wac (905) 521-5020.